



HOGOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGOL Soomaali Maay Newsletter
| **Bil'ly - Monthly** |

Walaa Tirooduung ki jero

- **TAfyaal Mahmuud H.Mahamd (Tarash) (1-2)**
- **Magmaag: Aathaa deer ki dhalli kiing dheefooyti: (3)**
- **Husuusty maalintii Baydhowu li hureeyi ii halgamayaalkii RRA 06/06/1999 (4)**

Tifafiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaalighy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howlling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Afmaay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.



Afyaal-Mahamud Haaji Mahamad Yarow (tarysh) maay kydhalythey tuulithy GUUMBI I GALOOL TUURY oo Buur hakapy 30 km ing jerty heg waaqoow amy tukud, Afyaalky maaybaa dhalythey 1954tii. Wal barashoothiis dugsighy quraangky isly tuulithy leey haki qaathithi. Aaawsheey ii aathiis oo sha tapeeng dartiyee, Abwaang tarysh maay li noolaayeey inaathiis aawshey qapii. Ku reed maddii usy inaathis goldhownymy kulu kulumi yaa maay go'aansithey inii iddy iskuhu tapy, 1967thi Abwaangky may ing boktaaleey Hamar, maaynaa ku seetheey daafy/haafidy Ansalooti la arra jerii iithoo maddaas ing jernii id usy ki jiithithaaw oo qaraaby eh.

Afyaal Tarash maay ki biireey amy ly nolol naghatthey owlaaddy derby jhiifky, maay eed ing jeelaayeey ing usy dhughunsythy heesoo lahaku dhiyaayii raadiyo muqdishow o madaas ku dareereng heesy goponimy doong e.



Muddy lammy siny maddii usy saas ki noolaayi yaa may haku war heleey ini usy hamar rooghy dad usy qaraapithiis e oo hildhipaane haayeen haanaasoo isky deyeeng inii yoo wethaang oo id-diyoo jeeyaang. Usuuny may eed ing jeelaayey ini usy iskulu noolaatho kuryty derby jhiifky eh oo eed iniis fahameeng yoony jeelayeng. Maddii hunguryghy aamayang usi ing bathiyaayeng iyooghoo leh oloolythy buuysoy niing heesase.

Sannathy ku reed Afyaalky maay ki biireey Kooththy fanaaniinta lithingky Qarangky ee Horseed. Maddii usu ha saari lammaatha hees shal eh Doobnimaatheey iyoonaay SabaSabaabuu oo afky Aaayoow e, Afyaal Tarash wal hiri usughoo liki eetheeyi Ka'aang diinimy maayna halis ing galeey eedna ingki dhowaatheey ing dil liki hukumo laaking Ilaaheey me erne. Afyaal Tarash oo heesy apuure eh, lahang saare eh, tume eh iyoonaay heesaaby eh; heessoosheey maayba ku mid eyiinaa:

Heesy waddani eh sithy Deghengkii Opoogheey, Dhulkeey Hothongky eh, Dugsiiloo, Wal daneeyaaw Dowlia ing baahinaayi iyo haanoo kale bathang.

Heesy siyaasy sarbeeb eh sithy Wal legdemeey, Loo jeroow, Gaal wal hallaayi, Weejithoow wapan saraarky eh, Weejithoow Withaang eel ki dhiithi iyo haanoo kale oo bathang.

Heesy jeel eh sithy Baariyoow Ebdiyoow, Shamsy, Moolimaad iyo haanoo kale

Maay tussale hang qaathithaaneey Dugsiiloo iyoonaay Weejithoow withaang eel ki dhiithi

Heesty Dugsiiloo

De'ethy koraasy ii dugsilowaa ahaa

Dadkeey, Dalkeey ii Diintey daraadiyoowaa duwaad ii qalang

Ing weddetheey dugsi weeydiyee

De'ethy koraasy ii dugsilowaa ahaa

Maallyngkeey doosheey mi diithaa epedkeey ku dambooyee

Apuur dambii ahaa, deheb ii luulaa ahaa

De'ethy koraasy ii dugsilowaa ahaa

Dowlaathii barrii ahaa

Ilaahoow dethaalkeey iingky darang

Aamiing

Heestii Weejithoow

Withaayoow wang maayaagheey weejithowkey withaantii eel ki dhiithi ing weeroow mik-iingki kooyaaso

Wabighii qulqulaayii ii warooghi walaaghoo dhuunty quuyaaw afkeeybaa ku waaysinaa

Withaayoow wang maayaagheey weejithowkey withaantii eel ki dhiithi ing weeroow mik-iingki kooyaaso

Warmooqoo waalineeghoo wal ma dhaamo lang waneey afar saary ii wang gurby sheena fathaaw

Withaayoow wang maayaagheey weejithowkey withaantii eel ki dhiithi ing weeroow mik-iingki kooyaaso

Ulmaathii werdiyaasi wal tareeghi waayeelky shaley oroothi wijisheey mal fathaaw

Diyaaring: Maalyng Abdi Nur Umrr ii
Abdullahi Sheikh MOhamed

Magmaag

Aathaa deer ki dhalli kiing dheefooyti:

Magmaagddung maayba ku hathalaasee is dhini roojhis omboo is barbardhik de'etha onog dhalathi waqti Deer e' ii onog dhalathi waqti Gu' omboo Haghaay e'. Maddii onogheethaas de'ethiyoo omboo gushoo li tiriyaaw gu'ghuleey lahangku bilaawee. Madduung maadaamaa kang Deerty dhalathi ku hor dhalathi haang kale hattina tirootha de'ethy gughuleey lahangku watha billaawaaw kullishoo jirhaangny kistoo ku dheeryi ama ku billeriny, maayba li taawiyeeey inii haang kale ku korssimy fayleyi amaba ku laf wiiny. Saasaa waqti dheeri e' dheef ku qabe haang kale liing arree: athaa deer ki dhalli kiing dheefooyti”.

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh
Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dgaghinky:



Warshaddy Aliindighy



Karky hangraabty warshaddy ha saarti

**Dhaghang ha jireeng eh oo iski filinaashy iyee lahaayeeng reer koofur galbeed.
Hatina haddii amaang helaang meelliyoowaa ku wethaayaang hoo Alla erra.**

Diyaaring: Ustaad Abdirahiing Hiddig ii Abdullahi Sheikh Mohamed



Lity June 1999 maaling
qof kasto o reer Koofur
galbeed qalbigy ingki
taalluwu. Bahthy
Dooqaadky Hoghol
maaybaa siing lenaa
Hambalyi. Intii
Qadiyadda ing dhimitiina
Ilaaheey ing nahariisy

Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, aniiki dir:

Eamil. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)
c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361

Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden